# WARSIDAHA AGA

# AGA NEWSLETTER

WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA
AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)
*A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE*

**TIRSIGA 4$^{AAD}$, SANNADKA 1$^{AAD}$, OKTOOBAR– DIISAMBAR 2018**

**HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA**

## Tusmada Tirsigan

**EREYGA TIFAFTIRKA**
AGA iyo 2018………...Bogga 2aad

**QORMOOYIN HORTABIN MUDAN**
Weerta af Soomaaliga iyo qurub Diiradeedyada baa/ayaa & waa……………………Bogga 3-6aad

**WARARKA WAXQABADKA AGA**
Xafladda 5guurada Aasaaska AGA..Bogga 7aad
Madaxweynaha Jabuuti oo AGA ku Maamuustay Billad Sharaf ………..Bogga 7aad
Hawlwadeenno ay AGA Guddoonsiisay Shahaado Sharaf………………………..Bogga 7aad
Guddoomiyaha Aqalka Sare oo Daahfuray Tababbarka Qoraal-Curinta Toolmoon.Bogga 8aad
AGA oo Buugaag ugu Deeqday Maktabadaha Cadaado iyo Garbahaarrey…………..Bogga 8aad
Madashii 4aad ee AGA ……………..Bogga 9aad
Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga oo Kulan-aqooneed u Qabatay Ardayda Jaamacadda Jigjiga…………………Bogga 9aad

**WARAR KALE OO XUSID MUDAN**
20guuradii Aasaaska Golaha Abwaannada Soomaaliyeed …………………..Bogga 11aad
Shahaado Sharaf la Guddoonsiiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga…….Bogga 11aad
Bandhig ku Saabsan Suugaanta Sayid Maxamed Cabdile Xasan oo ka Dhacay Magaalada Jigjiga……………………………….Bogga 12aad

**KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL-ABUURKIISA**
Baro Naxwaha Afka Hooyo…………Bogga 13aad
Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.Bogga 14aad

***MURTIDA TIRSIGAN***
*Maahmaahyo Saddex Shub ah.*Bogga 15aad

## WARSIDAHA AGA

***Ku soo dhowaada tirsiga 4aad ee warsidaha AGA!***

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan

Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore. Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu.

***Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah (eeg www.aga.so). Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so***



*'Tababbar-xirfadeedka Qoraal-curinta Toolmoon'*

**GOOSANKA TIFAFTIRKA**

**Tifaftiraha Sare**
Mustafa C.Fayruus

**Agaasimaha**
Axmed M.Dhicisow

**Agaasimaha Farsamada**
Axmed Faarax Saalax

**Kaaliyaha Farsamada**
Amiin Yuusuf Khasaaro

**Bahda tifaftirka**
Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi sh. Cabdi
Saynab Xaaji Axmed

**Kala xiriir : info@aga.so**
**Facebook: @Akadeemiye Goboleedka AfSoomaaliga**
**Twitter:@somaliacademy**
**Website :www.aga.so**

# ERAYGA TIFAFTIRKA

## Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga iyo Sannadka 2018

Haddaynu milicsano xaaladdii Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) ee sannadkan sii dhammaanaya ee 2018, waxaa noo muuqanaysa in uu ka mid ahaa kuwii ugu muhiimsanaa taariikhdeeda. Tusaale ahaan wuxuu ahaa:

- Sannad ay Akadeemiyadu ku guulaysatay waxqabad dhaxalgal ah, dhanka kalena ay ka hor yimaadeen caqabado iyo imtixaanno aan fududayn.
- Sannadkii ay shan jirsatay AGA.
- Sannad ay markii ugu horreysey, muddo aan yarayn ka dib, Dawladda Federaalka Soomaaliya miisaaniyadda qaranka ku dartay qoondadii kaga soo hagaagtay dhismaha xarunta Akadeemiye-Goboleedka ee Muqdisho.
- Sannadkii ugu horreeyey ee uu mid ka mid ah saddexda masuul ee ugu sarraysa dawladda Soomaaliya (Ra'iisulwasaare Xasan Cali Khayrre) ficil la taaban karo ku muujiyey taageeridda Akadeemiye-Goboleedka iyo qaddiyadda ay u taagan tahay ee ah daryeelka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa.

Dhinacyada kala duwan ee kor ku xusan haddaan ku bilowno dhanka waxqabadka iyo guulaha AGA ka soo hoysay, tusaale ahaan waxaa ka mid ah:

- Waxay daahfurtay warside si joogta ah u soo baxa oo xambaarsan xog iyo aqoon kala duwan (Warsidaha AGA);
- Waxay joogtaysay soo saaridda taxane-cilmiyeedkii sannadlaha ahaa ee 'Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida', waxayna sannadkan soo saartay buuggii labaad oo magaciisu yahay 'Hal-door: Taariikh-Nololeedkii iyo Dhaxal-Cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali';
- Waxay qabanqaabisay fagaarayaal lagu xusay maalmaha caalamiga ah ee xiriirka la leh hadafka AGA; sida Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, oo la qabtay 21 Feb. 2018, iyo Maalinta Caalamiga ah ee Buugga iyo Xuquuqda Hal-abuurka oo la xusay 23 Abril 2018;
- Waxay la daahfuray Dagalka internet-ka ee AGA (website) kaas oo noqday hoy hodan ku ah xog fara badan iyo aqoon xiisa leh ;
- Waxaa la sii hodanayeeyey bogga face-book-ga oo noqday xusuus-qorka AGA;
- Waxaa la abuuray madal-aqooneed si joogtaysan loogu kulmiyo bahda afmaalka, suugaanleyda, qalinleyda, dhaqan-jecesha iyo guud ahaan bahda aqoonta;
- waxay qabatay tababbarro taxane ah oo lagu magacaabay "Tababbar-xirfadeedka Qoraal-curinta Toolmoon" kaas oo xeeld-heerayaasha Akadeemiyadu kor ugu qaadayeen aqoon-xirfadeedda da'yarta hibada u leh qoraalka iyo hal-buurnimada, siiba xubnaha naadiyada akhriska iyo qoraalka iyo ardayda jaamacadaha, ayna ka faai'deysteen tiro ka badan 200;
- Waxay AGA sannadkan kor u sii qaadday u ololayntii iyo wacyigalintii ku wajahnayd hiilka afka hooyo iyo horumarinta adeegsigiisa, annagoo adeegsanayna warbaahinta Soomaalida iyo mid caalami ahba;
- Waxay AGA iska xilsaartay lafagurka buugaagta cusub iyo jahaynta qalinleyda soo koraysa.
- Waxaa la qabtay xaflad weyn oo lagu maamuusayey 5-Guuradadii dhalashada AGA.
- Waxaa la diyaariyay filin-taariikheed soo koobaya waxqabadkii Akadeemiye-Goboleedka.

Akadeemiye-Goboleedku hawlahaas iyo in aannaan sheeginba waxay qabatay iyadoo la daalaadhacaysa caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin la'aanta dhaqaalihii iyo agabkii loo baahnaa, haba ugu sii darraato xafiis la'aan, taas oo xaruntii dhexe ee la ballanqaaday aan weli la dhisin; dawladihii xubnaha ka ahaana ay ka baaqsadeen ballanqaadkoodii, marka laga reebo Dawladda Federaalka Soomaaliya oo runtii dadaashay itaalkeeda yar.

Sannadka cusub ee 2019 aad ayaan Akadeemiye ahaan ugu han weynnahay inaan ku sii tallaabsan doonno horumar intan ka badan, kana gudbi doonno oo la xallin doono caqabadaha aan sheegnay, waxaanan leenahay "kii noo hagaagoo noqo loo hanweynyahay!".

# QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

## Weerta Af Soomaaliga iyo Qurub Diiradeedyada baa/ayaa & waa

**Qore:**Dr.Cabdalla Cumar Mansuur

Waxaan halkan si kooban ugu qaadaadhigaynnaa arrimo la xiriira labada qurub ee kala ah: baa/ayaa iyo waa. Qurubyadan keligoodu wax micna ah oo ay leeyihiin ma jiro. Sidaas ay tahay waxay qayb weyn ka qaataan dhismaha weerta. Gaar ahaan, weer caddayn (declarative sentence) kasta ee caadi ah waa in gudaheeda laga helaa qurubyadan midkood, haddii kale weertaasi waa qalad ama waa qabyo. (1)Tus.:

**Cali moos cunay.* (waa qalad)

*Cali **baa** moos cunay.*(waa sax)

*Wiilka dugsiga u socda.*(waa qabyo) *Wiilka dugsiga u socdaa **waa** Cali.* (waa kaamil)

Hal weer gudaheedana lagama wada heli karo labo ka mid ah qurubyadan, sida:

*Cali baa moos waa cunay.

### 1. Kaalinta qurub diiradeedyada

Inta aanan gudagelin falanqaynta hawsha ay qurubyadani ka qabtaan weer tebineedda gudaheeda, waxaa marka hore loo baahanyahay in aan ogaanno waxa ay weeri ka koobantahay iyo waxa ay xambaarsantahay. Weertu waxay ka koobantahay ereyo laysku dhafay, kuwaasoo, guud ahaan, loo kala saaro laba kooxood: **mawduuc** (topic) oo ah shayga laga hadlayo (waa magac/magacuyaal oo noqon kara yeele ama layeele) iyo **khabar** (predicate) oo ah wax tilmaamaya waxa yeelaha laga sheegayo ama uu qabanayo. (2) Tus.:

*Cali baa buug **qoray**.*

*Cali **waa macallin**.*

Haddaba halkan mawduuca ama waxa laga hadlayo waa ereyada ama magacyada hoosta ka xarriiqan (sida *Cali* oo yeele ah iyo *buug* oo layeele ah), ereyada la madoobeeyeyna waa khabarka oo ah falka (sida *qoray,* oo tilmaamaya waxa yeeluhu uu ku sameeyey layeelaha).

Sideedaba marka qofi uu hadlayo wuxuu gudbiyaa inta badan war laba xog sida, qayb cusub iyo qayb la ogyahay ama aan sidaas muhiim u ahayn sheegisteeda. Qaybta cusub ayaana hadluhu diiradda ku saarayaa qurubka *baa* ama *waa*. Sidaa darteed ayaa loogu magacaabay labadooda *qurub diiradeed*.

Haddii qaybta weer tebineedda ee sidda warka cusub ay tahay qaybta mawduuca ama magacyada, waxaa lagu diiradeeyaa qurubka *baa* ama *ayaa*. Tus.:

***Cali baa** yimid.*

Halkan, in weertan qaybteeda magaca ah ay tahay midda sidda warka cusub waxaa caddaynaya weyddiinta ay ka jawaabayso weertu, oo ah: ***Yaa** yimid?* Weyddiintanina waxay muujinaysaa in lala hadluhu uu ogyahay in la yimid (oo ah khabarka), laakiinse aanu ogayn qofka yimid (oo ah mawduuca). Sidaa darteed ayaa diiradda loo saaray mawduuca oo ah yeelaha.

Haddiise yeeluhu uusan ahayn warka cusub, laakiin aan la ogayn waxa uu qabtay ama falkiisa, waxaa falka lagu diiradeeyaa oo laga hormarinayaa qurubka *waa*, sida:

*Cali **waa yimid.***

Weertan weyddiinteedana waxaan ka dareemaynnaa in Cali (oo ah yeelaha) laga warhayo, laakiin in uu yimid iyo in kale aan la ogayn. Si loo hubsado ayaa diiradda la saarayaa falkiisa: *Cali **ma yimid**? Haa,* (*Cali*) ***waa yimid***. Waxaa kaloo la oran karaa: *Cali muxuu sameeyey? Cali **waa yimid**.*

Sidoo kale waa la mid weerta ah: *Cali **waa macallin**.* Oo kaalintii falka ayaa waxaa galay magac khabareed, kaas oo ah ereyga *macallin*. Weertan qaybteeda dambe (...*waa macallin*) waa khabarka yeelaha. Qurubka *waa* mar waliba wuxuu diiradda saaraa, kana hormaraa falka ama khabarka oo keliya.

### 2. Waxyaabaha u gaarka ah qurubka *baa* ama *ayaa*

Marka hore labadan qurub (*baa* & *ayaa*) waa isku mid, isku hawl ayayna ka qabanayaan weerta gudaheeda—sida ay muujinayaan, tusaale ahaan, labadan weerood, oo aan waxba ku kala duwanayn:

*Cali **baa** yimid.*

*Cali **ayaa(3)** yimid.*

Qurubkaani wuxuu u gaar yahay in uu siyaabo kala duwan u diiradeeyo magacyada, yacnii markuu magucu yeele yahay iyo marka aanu yeele ahayn.

magacyada, yacnii markuu magucu yeele yahay iyo marka aanu yeele ahayn.

**A)** Haddii *yeeluhu uu yahay warka cusub*, yeelaha (oo noqon kara magac ama magacuyaal) waxaa lagu xijiyaa ama la raacsiiyaa qurubka *baa/ ayaa*, sida:

***Nin baa** libaax dilay.*

Halkan *nin* waa yeelaha, la yeeluhuna waa *libaax,* qurubka *baa*-na wuxuu diiradda saarayaa yeelaha. Tusaale kale waa:

***Gabar baa** xafiiska tagtay.*

(yee.) (layee.)

Sidoo kale waxaa la mid ah, marka yeeluhu uu yahay magacuyaal. Tus.:

***Adigaa*** *lacagta bixiyay.*

(yee.) (layee.)

Weertan dambe qurubkeedu wuxuu ku nabmay magacuyaalka, oo *adigaa = adiga+baa*. Halkan xarafka *b* waa la xadfay. Mararka qaarkood waxaaba la yiraahdaa: ***Adaa*** *tegey*. Markanna *adaa,* oo ka soo jeedda *ad**iga b**aa,* waxaa laga xadfay afarta xaraf ee dhexe: ***igab***.

**B)** Marka *warka cusub uusan ahayn yeelaha,* qurubka *baa* wuxuu diiradaynayaa *magaca aan yeelaha ahayn*. Markaan, qurubka *baa* waxaa lagu dhafaa magacuyaallo yeeleed oo gaagaaban (subject clitic pronouns), oo kala ah: *aan, aad, uu, ay* iwm—kuwaasoo matalaya yeelaha weerta—islamarkiina shaqal dheeraha qurubka ***baa*** ayaa meesha ka baxaya: *baa + aan = baan* (ama *ayaa+aan = ayaan*). (4)Tus.:

*Cali moos* ***buu*** *cunay*.

Halkan qurub diiradeedka *buu* (*baa+uu*) wuxuu diiradaynayaa magaca layeelaha oo ah *moos,* waana qaybta sidda warka cusub ee weerta; waxaana caddaynaya weyddiinta weertaas, oo ah: *Cali* ***muxuu*** *cunay?* (*Cali*) ***moos buu*** *cunay.*

Sidoo kale waxaa la mid ah: *Caasha* ***guriga bay*** *aadday.* Weertan weyddiinteedu waa: *Xaggay aadday Caasha?* Yacni, Caasha in ay meel aadday ayaa la ogyahay, laakiin lama oga meesha ay aadday. Sidaa darteed ayaa layeelaha oo ah *guriga* diiradda loogu saaray qurub diiradeedka *bay* (*baa+ay*). Magacuyaalka *ay* wuxuu matalayaa *Caasha* oo ah yeelaha.

**3. Qurub diiradeedyada iyo magacuyaallada**

Qurub diiradeedyadu (*baa*/*ayaa* & *waa*) marka ay diiradda saarayaan curiye aan ahayn yeele waa khasab in qurub diiradeedka lagu lifaaqo magacuyaal yeele oo gaaban, kaasoo matalaya yeelaha weerta (oo noqon kara magac/ magacuyaal ebyoon).

Waxaan shaxda soo socota ku muujinaynaa sida *magacuyaal yeele ee gaaban* iyo *qurub diiradeedku* ay isu dhexgelayaan:

Sidoo kale, qurub diiradeedka *waa* isna waa in lagu lifaaqaa magacuyaallada yeele ee gaagaaban, sida: *waan* (*waa + aan*), *waad* (*waa + aad*), *wuu* (*waa + uu*) *iwm*, waxaase shardi ah in khabarku yahay *fal*, tus.: *Axmed* ***wuu*** *seexday*. Waxaa kaloo la oran karaa: *Axmed* ***waa*** *seexday.* Haddiise khabarku yahay magac faleed, qurubka *waa* laguma lifaaqi karo magacuyaallada yeele ee gaagaaban, tus.:

*Axmed* ***waa*** *arday.*

**Axmed* ***wuu*** *arday.* (waa qalad)

Magacuyaallada yeele ee gaagaabani waa magacuyaallada yeele ee ebyoon oo la soo gaabiyay (*aniga > aan*), aan ka ahayn

| M.u. yeele oo ebyoon (5) | M.u. yeele oo gaaban | Q.diir. + m.u. yeele oo gaaban | Q.diir. + m.u. yeele oo gaaban |
|---|---|---|---|
| ani-ga | aan | baa+ aan | **baan** |
| adi-ga | aad | baa+ aad | **baad** |
| isa-ga | uu | baa + uu | **buu** |
| iya-da | ay | baa + ay | **bay** |
| anna-ga | aan | baa+ aan | **baan** |
| innaga | aynu | Baa+ayu | **baynu** |
| idin-ka | aad | baa +aad | **baad** |
| iya-ga | ay | baad +ay | **bay** |

magacuyaallada *isaga* iyo *uu* oo u muuqda in ayna is waafaqsanayn. Magacuyaalka *isaga* isbeddel baa ku dhacay. Asalkiisu wuxuu ahaa **usu*, labadan arrimood ayaana muujinaya:

1. Marka magacuyaalka "*uu*" uu ku lifaaqmo qurub diidmo, sida: "ma…-an." Tus.: *Isa-gu* ***ma uusan*** *garan* (*uus* + *an*).
2. Magacuyaallada lahjadaha Soomaaaliyeed iyo afafka kale ee Kushitigga, ayaa leh qaabkaas, sida ku cad shaxda soo socota. Qaabka asalkii hore (*Proto*-Kushitiggu)-na waa la mid:

| Maxaatiri | Maay | Ashraaf | Garre | Rendille | Cafar | Proto-Kush. |
|---|---|---|---|---|---|---|
| ani-ga | ana | an | ana | ani | ani | *ani |
| adi-ga | ada | at | adi | ati | atu | *atu |
| **isa-ga** | **usa** | **us** | **usu** | **usu/us** | **usu-k** | ***usu** |
| iya-da | iye | ish (a) | iyi | ice | is | *ise |

Magacuyaallada lahjadaha *Maxaatiri* oo keliya ayaa qodob ku lifaaqan; lahjadaha kale iyo afafka kale ee Kushitiggaba ma laha qodob. Caadiyan, magacuyaallada afafka dunida ugu caansan (Carabiga, Ingiriisiga iwm) ma laha qodob, maxaa yeelay halkan qodobku wax micno ah oo ku

soo kordhinayo ayaanba jirin. Mindhaa waxaa loo yeelay si loo kala duwo midka ebyoon (aniga) iyo midka gaaban (aan).

Mararka qaarkood xataa lahjadaha *Maxaatiri* waan ku arkaynnaa magacuyaalka oo aan qodob raacsanayn, sida: ***An****ba waan arkay* (***anigu****ba waan arkay*).

## 4. Qurub diiradeedyada iyo astaanta yeelaha

Yeelaha weerta inta badan waxaa lagu gartaa qaabka falka oo waafaqsan yeelaha xagga caynta iyo tirada. Waxaase dhici karta in yeelaha iyo layeelaha isku mid ka noqdaan xagga caynta iyo tiradaba. Sidaa awgeed, waxaa jira labo dibkabe oo kala ah: ***-u*** iyo ***–i***, oo lagu lifaaqo dhammaadka yeelaha, waxaana lagu magacaabaa ***astaanta yeelaha*** (subject marker).

Dibkabaha –u waxaa la adeegsadaa marka yeeluhu uu leeyahay qodob (sida: ninku waa yimid), halka dibkabaha kale –i lagu lifaaqo yeelaha aan cayimnayn, ama aan qodob la socon (sida: nini waa yimid)—

laakiin waxaa u sharad ah in markaas qurub diradeedku uusan diiradaynayn yeelaha, oo uu diiradeynaayo layeelaha ama khabarka. Tus.:

*Gabadh**u** moos **bay** cuntay.*

*Gabadh**i** moos **bay** cuntay.*

Yeeluhu wuxuu noqon karaa hal erey: *magac*, *magacuyaal ebyoon* (independent pronoun), *magacuyaal tilmaame* (demonstrative pronoun); wuxuuna ka koobnaan karaa laba erey ama in ka badan. Astaanta yeeluhu, marwaliba waxay ku lifaaqantaa dhammaadka yeelaha. Tus.:

**A)** Marka yeeluhu uu yahay hal erey:

***Macallink<u>u</u>*** *buugag buu sidaa.*

***Anig<u>u</u>*** *farriin baan kuu sidaa.*

***Taas<u>i</u>*** *waa walaashay.*

**B)** Marka yeeluhu uu ka kooban yahay laba erey ama in ka badan, ereyga hore ayaa ***madax*** (head) ah (6), kuwa ku xigana waa *faahfaahiyayaal.* Faahfaahiyaha ugu dambeeya ayaa lagu lifaaqaa astaanta yeelaha, laakiin falka ama khabarku wuxuu la jaanqaadaa ama waafaqsan yahay ***madaxa*** yeelaha:

*<u>**Maamulaha** dugsig**u**</u> waa nin suubban.*

*<u>**Agaasimaha** waaxda shaqaaluh**u**</u> xafiiskiisa ayuu nagu soo dhoweeyey.*

*<u>**Qoraaga** buuggan**i**</u> waa indheergarad.*

*<u>**Iskuxigga** ereyada weerta af Soomaalig**u**</u> waa sax.*

## 5. Qurub diiradeedyada iyo isbaddellada ku dhaca dhismaha weerta

Marka qurub diiradeedka *baa/ayaa* uu diiradaynaayo yeelaha, ha ahaado keli ama wadarba, dibkabaha falku waa soo gaabtaa, sida:

*<u>Wiilasha **ayaa**</u> mooska cunay**a**.*

*<u>Nin **baa**</u> moos cunay**a**.*

Markiise uu diiradaynaayo layeelaha saddex isbeddel ayaa dhismaha weerta ku dhacaya. Labadan tusaale ee soo socda waa isla labadii weerood ee aan kor ku soo xusnay:

*Wiilash**u** <u>mooska **ayay**</u> cunaya**an**.*

*Nin**i** <u>moos **buu**</u> cunaya**a**.*

Saddexda isbeddel ee ku dhacay labadan weerood waxay kala yihiin:

Magaca yeelaha waxaa lagu suntaa*astaanta yeelaha* oo ah: ***–u*** ama ***–i***;

Qurub diiradeedka waxaa ku larmaya magacuyaal yeele oo gaaban;

Dibkabaha falku waa ballaaranayaa.

Qurub diiradeedka *waa,* isagu mar waliba wuxuu diiradeeyaa falka ama khabarka. Saddex arrimood ayaana u xeer ah:

Rugtiisu mar waliba waa falka ama khabarka hortiisa;

Magaca yeelaha waxaa lagu suntaa *astaanta yeelaha* oo ah: ***–u*** ama ***–i***;

Dibkabaha falku waa ballaaranayaa.

Tusaale ahaan:

*Magaalad**u** **way** sii ballaaranays<u>**aa**</u>.*

*Macallinkan**i** **wuu** dadaalay<u>**aa**</u>.*

Sida aan kor ku soo aragnay qurub diiradeedka *baa*, xitaa qurubka *waa*, waxaa lagu lifaaqayaa magacuyaal yeele oo gaaban (*aan, aad, uu, ay*...), islamarkiina shaqal dheeraha qurubka ***waa*** ayaa meesha ka baxaya: *waa + aan = waan*; *waa + uu = wuu*). Haddiise khabarku uusan ahayn fal oo uu yahay magac faleed, qurubka *waa* laguma lifaaqi karo magacuyaal yeele. Tus.:

*Wasiirku **waa** dhakhtar.*

Sidoo kale laguma lifaaqi karo layeele marka yeeluhu yahay magacuyaalka ***la*** *qoflaawe,* sida:

***Waa la*** *hagaajiyay baabuurka.*

Yeelaha weerta lama yaqaan, sidaa darteed ayaa loo adeegsaday magacuyaal tilmaamaya qof aan la ogeyn.

## 6. Rugaha qurub diiradeedka iyo iskuxigga ereyada weerta

Labada qurub diiradeed (*ayaa* iyo *waa*) way ku kala duwan yihiin arrinta rugahooda.

**A)** Qurub diiradeedka *waa* rugtiisi isma beddesho. Waxaana mar walba laga helaa ka hor ama dhanka bidix ee khabarka, ha ahaado fal ama magac faleed.

Haddii khabarku uu yahay *fal* waxaa khasab ah in mar waliba ay weerta ka dhex muuqdaan labo astaan sarfeed. Waa in mid ka mid ah astaamaha yeeluhu (-u/-i) uu ka muuqdaa dhammaadka yeelaha(7), qaabka falkuna uu dheeraadaa. Tus.:

*Ardayg**u** **wuu** nasanay**aa**.*

Haddiise khabarku uu yahay magac faleed, yeelaha uun baa lagu lifaaqaa astaanta yeelaha, sida:

*Gabadh**u** **waa** Soomaaliyad.*

**B)** Qurub diiradeedka *baa/ayaa* dabeecaddiisu way ka duwan tahay midda qurubka *waa*. Caadiyan weerta Soomaaliyeed ereyadeedu waxay isugu xigaan sidatan:

*yeele* (Y) + *layeel* (LY) + *fal* (F), haseyeeshee isku xiggan waa isbeddeli karaa, sida *layeele + yeele + fal* iwm. Sida aan kor ku soo aragnayna, qurubkani mar wuxuu diiradeeyaa yeelaha, marna layeelaha.

Haddaba si aan la isugu qaldin magaca yeelaha ah iyo midka aan yeelaha ahayn, meel kasta ha ku sugnaadeene, waxaa lagu kala gartaa: Qurubka *baa* oo aan waxba lagu larin ayaa diiradaynaya magaca yeelaha;
markii lagu laro magacuyaal yeele oo gaabanna waxaa lagu diiradeeyaa layeelaha, sida aan kor ku soo aragnay.
Intaa ka sokow, qurub diiradeedka *baa/ayaa* isbeddel ayuu ku samaynayaa weerta, xagga sarfaha iyo xagga micnahaba. Tus.:

*Ardayg**u** macallinka ay**uu** la hadlaay**aa**.*
*Ardayg**a** **ayaa** macallinka la hadlay**a**.*
*Ardayga macallinka **ayaa** la hadlaya.*

Weertaan dambe oo ka kooban isla ereyadii labada weer ee hore waxaa isbeddelay micnihii. Markan macallinkii ayaa noqday yeelihii, halka weeraha kale uu ka ahaa layeele. Sababtuna waa qurub diiradeedka oo aan lagu lifaaqin magacuyaal yeele oo gaaban.
Shaxdan ayaan, hogatus ahaan, ku soo koobaynnaa qaababka suurtaggalka ah ee iskuxig-ga ereyada weerta fudud. Weeraha ku astaysan sumaddan (*) waa weero aan suurtaggal ahayn:

| **1** | **2** | **3** | **TUSAALOOYIN** |
|---|---|---|---|
| Y **ayaa** | LY | F | Wiilkii ayaa moos cunay. |
| Y **ayaa** | F | LY | Wiilkii ayaa cunay mooska. |
| Y | LY**ayuu** | F | Wiilkii moos ayuu cunay. |
| LY**ayuu** | Y | F | Moos ayuu wiilkii cunay. |
| LY**ayuu** | F | Y | Moos ayuu cunay wiilkii. |
| LY **baa** | Y | F | Moos baa wiilkii cunay. |
| *LY**baa** | F | Y | *Moos baa cunay wiilkii (8). |
| *Y | LY**ayaa** | F | *Wiilkii moos ayaa cunay. |
| Y **wuu** | F | LY | Wiilku wuu cunay moos. |
| **wuu** F | LY | Y | Wuu cunay moos, wiiku. |
| Y | LY **wuu** | F | Wiilku moos wuu cunay. |
| LY | Y **wuu** | F | Moos, wiilku wuu cunay. |

## Gabagabo

Waxaan ku soo gunaanadayaa, qofka doonayo in uu wax ka ogaado ama barto xeerka weerta Soomaaliyeed waa lagama maarmaan inuu darso nidaamka qurub diiradeedyada oo si aad u kooban aan ugu soo qaadaadhignay halkan. Haddii nidaamkooda aan la dhowrinna weertu qalad ayay noqonaysaa, *naxwe ahaan iyo micne ahaanba*, sida aan ka dareemayno weeraha soo socda ee wada qaldan

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Wiilka* | *Moos* | ***ayaa*** | *Cunayaa.* | (qalad) |
| **Wiilk**u*** | ***ayaa*** | *moos* | *Cunaya.* | (q.) |
| *Wiilk**a*** | ***ayuu*** | *moos* | *Cunaya.* | (q.) |
| *Moos* | ***ayuu*** | *cunayaa* | *Wiilk**u**.* | (q.) |

Maxaayeelay qurub diiradeedka lama ag dhigin meeshii loogu talaggalay, oo *baa* yeelaha ayaa u gaar ah, magaca aan yeelaha ahaynna waxaa u gaar ah: *baa+m.u. yeele oo gaaban*. Afartaas weerood oo sax ahina waa kuwan:

| ***Wiilka** | **Moos** | **ayuu** | **cunayaa** |
|---|---|---|---|
| *Wiilk**u** | **ayaa** | moos | cunaya |
| Wiilk**a** | **ayuu** | moos | cunaya |
| Moos | **ayuu** | cunayaa | Wiilk**u** |

Labadan qurub diiradeed iyo nidaamkoodu waxay ka mid yihiin waxyaabaha ka dhigaya af Soomaaligu in uu ka mid yahay afafka dunida ugu adag uguna nidaamsan. Arrintan ayaana soo jiidatay xiisaha cilmi-afeedyahanno badan oo shisheeye ah, laga bilaabo qaybta dambe ee qarnigii 19aad (Rigby, C.P. “On the Somali Language”, 1849, Bombay).

## Raadraac

Abdalla Omar Mansur, 1999, *Barashada Naxwaha Af Soomaaliga*, laqore Annarita Pugglielli, HAAN Associates, London.

### Tilmaamo

* Waxaan u mahadnaqayaa Md Idiris M. Cali iyo Dr. Jaamac Muuse Jaamac, oo igu dhiirrigeliyay maqaalkan, gacanna iga siiyay habayntiisa.

(1) Weeruhu waxay noqon karaan: weer caddayn/tebineed (sida: *Cali waa yimid*), weer diidmo (sida: *Cali ma cuno mooska* ), weer weyddiimeed (sida: *Cali ma yimid?*), weer amar (sida: *guriga aad!*) iyo kuwa kale. Weer caddayntu waa hab weereedka ugu adeegsiga badan, oo gudaheedana aan laga waynayn qurubyadan (baa/ayaa & waa) midkood, marka laga reebo weer caddayn aan caadi ahayn, sida: *Cali teg,* oo ah weer sax ah oo aan la hayn qurubyadaas. Laakiin qaab weereedkan, falka amminkiisu waa tagto oo keliya oo aan lahayn isrogrog caadi ah, inta badanna qofka saddexaad uun baa loo adeegsadaa, sidaa darteed waa hab adeegsigiisu aad u yaryahay.

(2) Khabar waa curiye ka tirsan weerta oo tilmaama waxa yeelaha laga sheego. Khabarku wuxuu u kala baxaa: kh. Faleed oo ah khabar ka kooban fal caadi ah, sida: *Cali baa **tegey***, iyo kh. Magaceed oo ah erey asalkiisu yahay magac oo gala kaalinta magaca, sida: *Cali waa **macallin***.

(3) Labadan qurub, degaan ahaan, qoloba mid ayay aad u adeegsataa, kuwana labadoodaba way adeegsadaan. Waxay yihiin waxa afqalaadka lagu yiraahado “variant”, sida labadan erey oo kale: gaari iyo baabuur. Marar dhif ah ayaa qurubka *baa* uun la adeegsan karaa, sida weyddiinta*: Ninkaas ma Cali **baa**?* Lama oran karo: **Ninkaas ma Cali ayaa?*

(4) Magacuyaal yeele oo koobani waxuu wakiil ka yahay magac ama magacuyaal ebyoon oo yeele ah, wuxuuna gadaal ugu larmaa qurub diiradeedyada.

(5) Magacuyaal ebyoon (independent pronoun) waa magacuyaal yeele oo keligii istaaga, qodobna yeelan kara.

**(6) Madax** waxaa ah ereyga saldhig u ah dhismo laysku yiraahdo *oraah magaceed* (nominal phrase) oo ah cutub ka kooban magac wata tifaftire (qodob, tilmaame iwm), faahfaahiye (modifier) oo ah erey ama ereyo ama weer faahfaahisa xubin ka tirsan weerta, sida*: **Maamulaha** dugsiga sare ee Raage Ugaas **ayaa** ku shaqa leh arrintaas; **Guddoomiyaha** Jaamacadda oo fadhiya xafiiskiisa **baa** saxiixay wareergatadan.*

(7)Xaalado gaar ah ayaa astaantaas aan ka muuqanayn yeelaha dhammaadkiisa, sida magaca gaarka ah, iwm.

(8) Qaabkan qalad ayuu la noqon karaa dadka qaarkood, gaar ahaan Soomaalida Koonfureed, waxaase xaaladdaan loo baahan yahay in codkacu uu ku dhaco yeelaha oo ah *wiilkii*, haddii kale waa qalad. Sidaan oo kale waxaa la mid ah weertan: *Nin baa libaax dilay*, oo micnaheedu ma cadda midka la dilay iyo kan la dilay. Sidaa darteed ayaa lagama maarmaan ah in codkac ku dhaco midka yeelaha ah.

# WARARKA WAXQABADKA AGA

## Xafladdii 5-guurada Aasaaska Akadeemiye-Goboleedka

Xaflad lagu maamuusayay 5guurada aasaaskii Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) ayaa lagu qabtay magaalada Muqdisho 13/11/2018.

Xafladdan oo si weyn loo soo agaasimay waxay ka dhacday Hoteel Royal palace, waxaana ka soo qaybgalay masuuliinta Akadeemiya-Goboleedka oo ka kala socday Akadeemiye-Goboleedka ee xarunta iyo laamaha gobollada iyo qurbaha; waxaa kale oo ka soo qaybgalay madax ka tirsan Dawladda Federaalka Soomaaliya oo uu ugu horreeyo guddoomiyaha Aqalka Sare mudane Cabdi Xaashi Cabdillaahi, golaha abwaannada, xeeldheerayaal af Soomaaliga iyo suugaantiisa, dhallinyarada naadiyada iyo marti sharaf kale.

Xafladda waxaa lagu soo bandhigay taariikhda, waxqabadka iyo horumarka Akadeemiye-Goboleedku ay ku tallaabsatay muddada shanta sannadood ah ee ay jirtay.

Waxaa shahaado sharaf la guddoonsiiyay Masuuliin uu ugu horreeyo

Madaxweynaha Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, aqoonyahanno, xeeldheerayaal iyo hawlwadeennada Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga.

Shan sanno ka hor, 26 Juun 2013, kulan ay isugu yimaadeen madaxda dawladaha Geeska Afrika oo ka dhacay magaalada Jabuuti, ayaa dhidibbada loogu taagay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga si ay wax uga qabato daryeelka iyo horumarinta af Soomaaliga



## Madaxweynaha Jabuuti oo AGA ku Maamuustay Billad Sharaf

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay billad sharaf ku maamuustay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Md Ismaaciil Cumar Geelle, dadaalkiisa hagar la'aaneed ee uu la garab taagan yahay daryeelka iyo hiilka af Soomaaliga darteed. "Madaxweynaha Jabuuti waa u hiilliyaha af Soomaaliga, wuxuuna innaga mudan yahay billad sharaf iyo ka badanba" ayuu yiri Dr Maxamed Daahir Afrax oo munaasabaddan ka hadlay.

## Hawlwadeenno iyo Waxgarad ay AGA Guddoonsiisay Shahaado Sharaf

Kaalinta ay ka qaateen u hiillinta afka hooyo darteed waxay AGA shahaado sharaf guddoonsiisay Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Xirsi Dhuux Maxamed iyo mudane Iraad Cabdi Aadan. Sidoo kale waxay shahaado sharaf guddoonsiisay hawlwadeennada AGA ee kala ah: Xeeldheeraha af Soomaaliga kana mida maqaawiirta AGA Prof Cabdalla Cumar Mansuur; wakiilka AGA ee USA, Macallin Saciid Saalax Axmed; wakiilka AGA ee Yurub Md, C/raxmaan Abtidoon; wakiilka AGA dalka Ingiriiska Prof. C/qaadir Ruumi; wakiilka Baydhabo Prof. Maxamed Cali Kalaay; xoghaynta xarunta dhexe Saynab Xaaji Axmed (Ugbaad); agaasimaha warbaahinta C/llaahi Xasan (Shiikhaalow).



## Guddoomiyaha Aqalka Sare oo Daahfuray Tababbarka Qoraal-Curinta Toolmoon

Xaflad lagu daahfurayay 'Tababbar-xirfadeedka Qoraal-curinta Toolmoon' ayaa lagu qabtay Muqdisho 25/10/2018. Tababbarkan oo ka kooban saddex dufcadood, soconayana muddo bil ah, waxaa qabanaya Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, waxaana loogu talagalay inay ka faa`idaystaan (120) ah dhallinyarada hal`abuurka leh.

Xafladda daahfurka tababarradan waxaa ka soo qaybgalay Guddoomiyaha Aqalka Sare, xildhibaanno, madaxda Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, Golaha Abwaannada, masuuliinta Naadiyada Akhriska iyo Qoraalka, iyo dhallinyarada daneeya hal`abuurka qalinka iyo curinta.

"Tababbarkan, aad ayuu uga mug weyn yahay kuwii ka horreeyay, maalmo ayuu socon doonaa, casharro is daba joog ah ayaa lagu qaadan doonaa, layliyo ayaa la isu diri doonaa, shahaadooyin ayaa gabagabadiisa lagu bixin doonaa" ayuu yiri Dr Afrax, oo dhinaca kale caddeeyay in uu jiri doono tartan ku aadan sheeko-curinta, iyadoo lagu bixin doono abaalmarino iyo shahaadooyin.

Munaasabaddaas, waxaa iyaguna ka hadlay Xildhibaan Sahro Cumar Maalin, Abwaan Xirsi-dhuux Maxamed, Madaxa Tababbarada AGA, Al-ustaad C/llaahi Sheekh (Gacanka), Marwo Dahabo Sheikh Maxamuud oo ka tirsan Naagiga "SomaliPEN"; iyo sidoo kale C/qaadir Cabdi (Jubba), Khadar Cabdi C/laahi iyo Najax Aadan oo ku kala hadlayay magaca naadiyada Hillin-hayaan, Banaadir iyo Maskaxshiil.




## AGA oo Buugaag ugu Deeqday Maktabadaha Cadaado iyo Garbahaarrey

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA), ayaa 17/8/2018 waxa ay buugaag ugu deeqday makatabadaha Cadaado iyo Garbahaarrey oo labadaba dhowaan albaabada loo furay.

Saynab Xaaji Axmed (Ugbaad), oo ka mid ah masuuliinta Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa buugaagtaas guddoonsiisay masuuliin ka socotay maktabadahaas.

Hadal kooban oo ay goobtaas ka soo jeedisay Saynab, waxay sheegtay in Akadeemiye-Goboleedka ay ka go'an tahay taageeridda maktabadaha guud. Masuuliintii ka socday maktabadaha Cadaado iyo Garbahaarrey, oo iyaguna munaasabadaas ka hadlay ayaa Akadeemiya-Goboleedka uga mahadceliyay deeqdan buugaagta ah, kuna bogaadiyay kaalinta firfircoon ee ay ku leedahay u hiillinta afka hooyo.



## Madashii 4aad ee AGA oo lagu soo Bandhigay Daraasad ku Saabsan Qoriddii Far-Soomaalida

Madashii 4aad ee Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa Muqdisho lagu qabtay 6/11/2018, waxaana lagu soo bandhigay daraasad cusub oo ku saabsan qoriddii Far-Soomaalida, oo uu diyaariyay Abwaan Cali-Deeq Maxamed Xaashi.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, Dr Maxamed Daahir Afrax, oo ka hadlayay furitaankii madasha, ayaa sheegay in uu ku faraxsan yahay Madasha 4-aad ee AGA bogaadinayana abwaanka isku hawlay daraasaddan. “Abwaan Cali-deeq Maxamed Xaashi, waa nin hibooyin badan leh, horay waxa uu u ahaa suugaan-yahan iyo suxufi, haatanna waxa uu ku dar-saday cilmibaaris” ayuu yiri Dr Afrax, oo caddeeyay Madasha AGA in ay tahay madal-aqooneed loogu talagalay in cilmiga lagu kala faa’idaysto.

Madasha waxa kale oo bilay fannaaniinta kala ah, Salaad Maxamed Shardi “Derbi”, Faadumo Cali Nakruuma, Farxaan Xiddig, qoraaga buugga Af-dhaab Cusmaan Cab-dinuur Xaashi, Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Md Xirsi-dhuux Max-amed iyo xubno kale oo isugu jiray aqoon-yahanno, fannaaniin, saxafiyiin iyo dhal-linyarada danaysa akhrisa iyo qaraalka oo munaasabaddaas ka soo qaybgalay.

Daraasadda maanta la soo bandhigay oo aheyd mid aad u xiisa badan ayaa si faah-faahsan waxa ay uga hadlaysay waxgarad-kii dadaalka dheeraadka ah u soo galay qoridda Far Soomaalida iyo sida ay mudan yihiin tixgelin gaar ah.



## AGA oo Kulan-Aqooneed u Qabatay Ardayda Jaamacadda Jigjiga

Kulan-aqooneed ay soo qabanqaabisay Akadeemiye-Gobleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa Machadka Daraasaadka AfSoomaaliga iyo Suugaantiisa ee Jaamacadda Jigjiga ayaa lagu qabtay 24/11/2018 Xarunta Jaamacadda Jigjiga ee Magaalada Jigjiga.

Kulan-aqooneedkan waxaa ka faa`iidaystay ardayda Jaamacadda Jigjiga, waxaana cashar cinwaankiisu ahaa ‘***Dhaqanka Soo-maalida iyo Hal-abuurkiisa: Mugdi-ka-saarka Eraybixinta’*** u jeediyay Guddoomi-yaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaali-ga Dr Maxamed Daahir Afrax; sidoo kale, waxaa la soo bandhigay suugaan isugu jirtey maansooyin iyo riwaayad gaaban oo ay soo badhigeen ardayda Jaamacaddu.




Kulan-aqooneedkan waxaa goobjoog ka ahaa, hadallana ka jeediyey madax sare oo ka tirsan Dawlad-Degaanka Soomaalida, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen wasiirka Agaasinka Waxbarashada, Lataliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Bulshada, Agaasimaha Machadka Daraasaadka AfSoomaaliga iyo Suugaantiisa, aqoonya-hanno, abwaanno, iyo marti-sharaf kale.

## Wafdi ka Socda AGA oo Kulan la Yeeshay Madaxweynaha Dawlad-Degaanka Soomaalida

Wafdi ballaaran oo ka socday Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa 24/11/2018 la kulmay Madaxweynaha Dawlad-deegaanka Soomaalida, Md Mustafa Maxamed Cumar.

Wafdigan, oo uu hoggaaminayey Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax, waxaa ka mid ahaa masuuliin iyo maqaawiirta AGA oo kala ah Qoraa Axmed Faarax Cali (Idaajaa) iyo Mudane Ismaciil Xuseen Taani.

Wafdigani waxa uu qayb ka ahaa xeeldheerayaasha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ee ka qaybgalay 'Bandhig-Suugaaneedka Caalamiga ah ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan' 17-19/11/2018 laguna qabtay magaalada Jigjiga.

Hadal uu munaasabaddaas ka soo jeediyay Guddoomiyaha AGA, Dr Maxamed Daahir Afrax,waxa uu Madaxweyne Mustafe xogwarran ka siiyay taariikhda iyo hawlaha ay qabato Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu, waxaana uu halkaas ku guddoonsiiyay buugaag, nuqullo ka mid ah Warsidaha AGA iyo qoraallo ku saabsan hawlaha ay qabato Akadeemiya-Goboleedku, isagoo dhanka kale ka codsaday in ay Dawlad-deegaanka Soomaalida ay kaalin muuqata ka qaadato hirgalinta iyo hawlgalka AGA.

Madaxweynaha Dawlad-deegaanka Soomaalida, Md Mustafa Maxamed Cumar, oo isna kulankaas ka hadlay ayaa soo dhoweeyay dadaalka ay Akadeemiya-Goboleedka Af Soomaaliga ka gaysato daryeelka afka hooyo una ballanqaaday taageero buuxda.

Kulankaasi uu Madaxweynaha Dawlad Deegaanka Soomaalida la qaatey wafdiga ka socday Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa ku soo gabagaboobay jawi aad u qurux badan.



## Tababbar-Xirfadeedka Qoraal-Curinta Toolmoon oo la soo Gabagabeeyay

Tababbar-xirfadeedka qoraal-curinta tool-moon" oo loo qabtay dhallinyarada hal`abuurka qalinka ayaa 19/12/2018 Muqdisho lagu soo gebagabeeyay.

Tababbar-xirfadeedkan waxaa ka faa`iidaystay in ka badan 120 ah dhallinyarada hal`abuurka qalinka, oo intooda badani ka tirsan naadiyada akhriska iyo qoraalka ee Banaadir, Hilin-Hayaan. Xamar, Xarunta Ifiye iyo Golaha Maskax-Shiil iyo dhallinyaro kale oo ka tirsan saxaafadda, jaamacadaha iyo bahda qoraalka.

Tababbar-xirfadeedkani wuxuu ka koobnaa saddex dufcadood oo taxane ah, wuxuuna soo bilowday 29/10/2018, waxaana la soo gebagabeeyay 19/12/2018.

Waxaa tababbar-xirfadeedkan bixiyay xeeldheerayaal ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka, oo kala ah: Dr Maxamed Daahir Afrax, Mustafa Cabdullaahi Fayruus, Cabdullaahi Sh Cabdi Aadan "Gacanka".

"Waxaan ku faraxsanahay in aan tababbarkan qaadanay, waxaanan rajeeynayaa inuu naga kaabi doono habka qoraal curinta" ayuu yiri Guddoomiyaha Naadiga Banaadir mudane Khadar Cabdi Cabdi Cabdillaahi.

"Waan u mahadnaqaynaa Akadeemiya-Goboleedka Af Soomaaliga oo isu taagtay siday u kobcin lahayd xirfadda dhallinyarada hal`abuurka qalinka" ayuu yiri Guddoomiyaha Naadiga Hilin Hayaan mudane Cabdulqaadir Jubba.

Tababbarkan, ayaa qayb ka ahaa tababbaro ay Akdeemiyadu ugu talagashay kobcinta iyo godlinta xirfadda qoraalka dhallinyarada Soomaaliyeed.



# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## Golaha Abwaannada Soomaaliyeed oo u Dabaaldegay 20guuradii Aasaaska Golaha

Xaflad loogu dabaaldegayay 20guurada aasaaska Golaha Abwaannada Soomaaliyeed ayaa 19/9/2018 lagu qabtay Muqdisho.

Xafladdan oo uu soo qabanqaabiyay Golaha Abwaannada Soomaaliyeed, oo uu horkacayay ku-simaha Guddoomiyaha, ahna guddoomiye ku xigeenka Golaha abwaannada Abwaan Xirsi-Dhuux; waxaa ka soo qaybgalay masuuliin ka tirsan Dawladda Federaalka Soomaaliya, oo ay ka mid ahaayeen Guddoomiyaha Aqalka Sare mudane Cabdi Xaashi Cabdillaahi iyo R/wasaare ku xigeenka mudane Mahdi Guuleed, abwaanno iyo hal`abuur Soomaaliyeed, iyo bahda afka iyo aqoonta.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA), oo ka mid ahayd martidii xafladda, ayaa si kalgacal leh ugu hambalyeysay Golaha Abwaannada Soomaaliyeed. "Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Golaha Abwaannada Soomaaliyeed waa mataano leh xiriir wada shaqayneed ku dhisan sidii la isaga kaashan lahaa daryeelka iyo horumarinta Afka Soomaaliga iyo Hal-abuurkiisa" ayaa lagu yiri hambalyada Akadeemiya-Goboledku u gudbisay Golaha Abwaannada.




## Shahaado Sharaf la Guddoonsiiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga

Golaha Abwaannada Soomaaliyeed ayaa shahaado sharaf guddoonsiiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, waxaana bixinta shahaadadaas lagu sharfay Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Federaalka Soomaaliya Md Cabdi Xaashi Cabdillaahi.

Shahaadadaas waxaa Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga u guddoomay, Prof. Mustafa Cabdullaahi Fayruus. "Akadeemiye-Goboleedku waxa ay shahaado sharaftan ku mutaysatay dadaalka ay ugu jirto daryeelka Afka hooyo iyo hal-abuurkiisa" ayuu yiri ku-simaha guddoomiyaha Golaha Abwaannada Soomaaliyeed Abwaan Xirsi-dhuux Maxamed.

Prof. Mustafa C/llaahi Fayruus oo isna hadal kooban goobta ka soo jeediyay munaasabadaas ayaa sheegay in ay Akadeemiye-Goboleedku ku faraxsan tahay shahaadada la guddoonsiiyay, isagoo caddeeyay in ay Akadeemiyadu ka go'an tahay sidii loo sii xoojin lahaa wada shaqaynta iyo saaxiibtinimada u dhaxaysa Golaha Abwaannada Soomaaliyeed iyo Akadeemiye-Goboleedka.

Sidoo kale, waxaa isna la guddoonsiiyay shahaaddo sharaf, Guddoomiyaha (AGA) Dr Maxamed Daahir Afrax.

Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Soomaaliyeed Abwaan Xirsi-Dhuux Maxamed oo ka hadlay munaasabadii lagu bixinayay shahaadadaas, ayaa sheegay in Dr Afrax uu shahaadan ku mutaystay dadaalkiisa joogtada ah ee uu ku bixiyo hiilka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa.



## Bandhig ku Saabsan Suugaanta Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo ka Dhacay Magaalada Jigjiga

Bandhig loogu magac-daray "Bandhig-suugaaneedka Caalamiga ah ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan" oo socday 17-19/11/2018 ayaa lagu qabtay magaalada Jigjiga, DDS.

Bandhiggan waxaa ka soo qaybgalay madax ka socotay Dawlad-deegaanka Soomaalida, masuuliin iyo xeeldherayaal ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA), abwaanno, qorayaal, ehelada Sayid Maxamed, Madax-dhaqameed iyo waxgarad kala duwan oo ka tirsan bulshada Soomaaliyeed. Martidani waxay ka kala yimaadeen Muqdisho, Jabuuti, Hargeysa, Kismaayo, Garoowe iyo Qurbaha.

Bandhiggan waxaa furay Wasiirka Madaxtooyada Dawlad-deegaanka Soomaalida Md Cabdirisaaq Sh C/raxmaan. Sidoo kale waxaa goobta ka hadlay La-taliyaha Madaxweynaha Sh. Ibraahin Maxamed Xuseen, oo ku hadlayay magaca qabanqaabiyayaasha bandhigga, wuxuuna u mahadceliyay dhammaan martidii ka soo qaybgashay.

Qoraa Axmed Faarax Cali (Idaajaa) oo isna ka hadlay munaasabdaas, ayaa si qoto dheer uga sheekeeyay taariikhdii Sayidka, waxaana uu fagaarahaas ka akhriyay qaar ka mid ahaa gabayadii Sayid Maxamed C/lle Xasan.

Bandhigga waxaa kale oo qayb ka ahaa buuggaag kala duwan oo madasha lagu soo bandhigay, waxaana ka mid ahaa Diiwaanka Gabayadii Sayidka, Taariikhdii Daraawiishta iyo kuwo kale.



## Jaamacado Qabtay Barnaamijyada Dhaqanka iyo AfSoomaaliga

Bandhigga dhaqanka ee Jaamacadda caalamiga ah ee Soomaaliya (SIU) ayaa magaalada Muqdisho qabatay toddobaadka dhaqanka oo socday intii u dhaxaysay 11-12 /9/2018.

Bandhiggan oo lahaa xiiso gaar ah ayaa ardayda jaamacaddu ku loolamayeen dhinacyada dhaqanka iyo afka. Madaxa Tababbaradda Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Md Cabdullaahi Sh Cabdi Aadan (Gacanka) ayaa qayb ka ahaa guddi garsoorayaal ah oo loo soo xulay garsooridda tartanka.

Tartankan oo ahaa mid xamaasad badan, waxaa kaalinta koowaad ku guuleystay Kulliyadda Caafimaadka, kaalinta labaad waxaa galay Kulliyadda Ganacsiga iyo Dhaqaalaha, halka kaalinta saddexaad ay gashay Kulliyadda Beeruhu.

Dhanka kale, Jaamacadda Daarul-xikma, ayaa u qabatay 50 ka mid ah ardayda Jaamacadda tababbarka qoraalka toolmoon ee Afka Soomaaliga. Madaxa tababbarada Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) Md, Cabdullaahi Sh Cabdi Aadan (Gacanka), ayaa ka mid ahaa macallimiinta tababbarka bixinayay.

Beryahan dambe waxaa soo kordhaya barnaamijyada afka iyo dhaqanka ee ay qabtaan jaamacadaha Soomaaliyeed.



# KORORSO AQOONTAADA

## Baro Naxwaha Afka Hooyo

**Dibkabe**

Dibkabeyaashu waa qayb ka mid ah ereyada afka ku jira. Keligooda isma taagi karaan. Mar kasta waxay u baahan yihiin in erey kale gadaal looga dhejiyo. Dibkabeyaasha shaqadoodu waxay tahay in ay si fudud oo la wada garan karo u ballaariyaan micnaha ereyo afka horay ugu jiray.

Tusaale: ereyga fardoole wuxuu ka soo farcamay ereyga (fardo) oo dibkabaha “le” gadaal looga dhejiyey. Waxaa la mid ah ‘dukaanle, waranle; sidoo kale, bare = bar+e, fure = fur+e.

Ereyada ku dhammaadа “e” waxa ay leeyihiin inta badan macne ah qof ama wax sameeyey hawl gaar ah. Ereyada ku dhammaada “le” waxa ay tilmaamaan qof wax leh ama wax la leeyahay.

**Sammi**

Dhaqanka Soomaalida waxaa ka mid ah marka qofka ay ilmo u dhashaan inuu ku samiyo qof ay saaxiib yihiin oo uu aad u qadariyo ama qof magac weyn bulshada dhexdeeda ku leh. Waxaa la yiraahdaa hebel iyo hebel ama hebla iyo hebla waa la isku samiyey. Taas micnaheedu wuxuu yahay, labadaas qof waxay wadaagaan magac isku mid ah, hase ahaatee, waa laba qof oo kala duwan.

Sidaas oo kale, xagga barashada naxwaha af Soomaaliga, sammi waxaa la yiraahdaa laba erey oo muuqaal ahaan kala duwan hase ahaatee, misna leh micna isku mid ah sida: irrid, illin. Labada jeerba isku wax ayaan ka hadlaynaa. Sidaas daraadeed, ereyada irrid iyo illin waa sammi.

**WD Cabdullahi Maxamed Sheegow**



# Kaalinta Shaqalku ku Leeyahay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed




Maansada laamaheeda kala geddisan sida: gabayga, guurowga, geeraarka, jiiftada, buraanburka, saarka, iyo haltirinnada kale Jaad-tixeed waliba wuxuu leeyahay miisaan u gaar ah, oo ka baadi sooca qaybaha kale.

Guud ahaan miisaanka maansada waxaa gundhig u ah tirinta shaqallada. Haltirin waliba waxay ku soohantaa shaqallo go'an oo laysla ogyahay tiradooda. Sidaa daraadeed, jaad tixeed waliba miisaankiisu wuxuu ku xiran yahay hadba tirada shaqallada uu ku soohmo halbeegga maansoobidiisa.

**Miisaanka Beydka Gabayga.**

Beydka gabayga waxaa looga baahan yahay inuu ku dhisnaado 20 ama 21 shaqal. Wixii tiro intaa ka yar ama ka badan lehna ma noqon karaan meeris gabay oo quman.

Tusaale ahaan aan u soo qaadanno dhowr meeris oo gabayo ka geddisan ku jira.

Waa i-din-da-gaa-yaa kuf-ri-ga,
aad u dab-cey-saa-ne
**Sayid Maxamed Cabdille**

Nin-kii a-ni-ga i-ga maar-mi ka-ra,
u-ma mu-raad yee-sho
**Saahid Qamaan**

Had-daad dhi-ma-to gee-ri-du mar-bey,
no-lo-sha dhaan-taaye
**Salaan Carrabey**

Wal-lee i-na ra-gow ta-la ad-duun,
taa-da uun ma a-ha
**Qamaan Bulxan**

Halkaa waxaa innoogu caddaaday in tirada shaqallada looga baahan yahay meeriska gabayga 20 ama 21 shaqal.

Haddaba, gabayga aan miisaameyno beydadkiisu haddii ay ku salaysnaan waayaan jaangooyada tirada shaqallada looga baahan yahay meeriskiisa, waxaa innoo caddaanaysa in aanu gabay ahayn oo uu yahay jaad tixeed kale.

**Miisaanka baydka buraanburka**

Buraanburku waa jaad tixeed ka mid ah maansada, waxaana caan ku ah inta badan tirintiisa dumarka.

Meeriska buraanburku wuxuu ka kooban yahay laba dhud oo kala dheer. Dhudda hore waa 10 shaqal, dhudda dambena waa 8 shaqal, Mar mar dhif ah ayaa dhudda hore 11 shaqal noqotaa.

Tusaaleyaal aan soo qaadano:

Ga-ba-dhu waa Faa-du-moo,
wiilka waa Maxamed

In-taa-daan cad-daan ca-biid,
baanu wada aheyn

Socdaal kii jiray Soo-,
maa-li kii maq-naa

Calool nugulaa carruur-,
tay-da aab-ba-hood

Haddaba, isku soo wada duuboo guud ahaan haltiirinnada maansada laamaha kale ee harey, jaad tixeed waliba wuxuu leeyahay miisaan u gooniya oo uu kaga soocan yahay badaha kale ee maansada. Tusaale ahaan sida aan ku soo arragney gabayga iyo buraanburka ee aan soo faahfaahinay ayaad ka tiixraaci kartaa jaadadka kale ee maansada.

**WD Cabdulaahi Cabdi Aadan (Gacanka )**
**E-Mail: gacankalfle@gmail.com**

**U Hiili Afkaaga Hooyo**

# MURTIDA TIRSIGAN

## Maahmaahyo Saddex Shub ah



Qormadeenan waxaan ku soo qaadanaynaa murti iyo maahmaaho saddex shub ah.

**Saddex dadka ayaa kuugu jaclaada:-**

- Salaanta badan.
- Fadhiga oo aad balaariso.

Magac fiican ood ugu yeerto.

**Faa'iidada qoraalka waa saddex:-**

- In aan la iloobin.
- In aan wax lagu darin.

Iyo in aan wax laga dhimin.

**Saddex waa indha qabowsi:-**

- Haweeney raalliyo ah.
- Saaxiibbo ku jacal.

Iyo ubad baariyaal ah.

**Saddex ayuu cilmigu ku koraa:-**

- Barasho wixii aadan aqoon.
- Xifdin wixii aad baratay.

Iyo fidin wixii aad qaybtay.

**Saddex waa dabeecadda mu'minka:-**

- Run sheegidda.
- Aaminnimada.

Iyo deeqtoonida.

**Saddex Saddex ma aha:-**

- Habhab orod maaha.
- Himbiriirsi arag maaha.

Hunnu-hunnu hadal maaha.

**Taladdu waa saddex heer:-**

- Mar aad garan waydo.
- Mar aad gaari waydo.

Iyo maray kula gudboon tahay.

**Saddex ayaad qofka ku baratаa:-**

- Inaad jid la marto.
- Inaad jidiin la cunto.

Iyo inaad jabad la gasho.

**Saddex laguma daydo:-**

- Nin xaasid ah.
- Nin xanlow ah.

Iyo nin xaaraan cun ah.

**Saddex ruuxa muslimka ah waa u sharaf:-**

- Cafinta ruuxa dulmiya.
- Wax siinta ruuxa u adeega.

Iyo xariirinta ruuxa xiriirkiisa gooya.

**Saddex saddex ayaa laga hormariyaa:-**

- Geeddiga sahaydaa laga hormariyaa.
- Guriga dariskaa laga hormariyaa.

Dadkana saaxiibkaa laga hormariyaa.

**Ilaahow saddex adaa kaa magan galay:-**

- Qalbi aan qushuuc lahayn.
- Duco aan la aqbal ahayn.

Iyo cilmi aan lagu intifaacayn.

**W/D Cabdinaasir Yuusuf Macalin Xuseen**

# Maana-faay oo dib u dhalatay!

Dadka akhriska jecel, siiba dadkii muddada dheer u xiisa qabey buugga sheekadii caanka ahayd ee ***Maana-faay***, waxaa loogu bishaaraynayaa inay hadda diyaar tahay daabacaad cusub oo kuwii hore ka sii xiisa badan kana sii tifaftiran, ahna tan keliya ee saxda ah.

meelaha laga heli karo kala xiriir AGA Tel. **(+252) 618383819 (Saynab Xaaji) ama (+252) 617867790 (Dayax).**

